# Qodobada guud ee hadalka ee loogu tala galay la hawlgaleyaasha dhamaadka faaiidooyinka cunnada ee degdegga ah ee SNAP COVID-19 (Qoondada Gargaarka Degdegga ah ee SNAP)

***Xasuusin loogu tala galay la hawlgaleyaasha:*** *Qodobadaan hadalka waxaa loo bixiyaa sidii hage loogu tala galay wada sheekeysi waana inaan la qeybin. Wada sheekeysiga waa in la habeeyo si wax looga qabto baahiyaha iyo suaalaha gaarka ah ee shakhsiga. Dhigaalada laga helo caawimaada hoos ayaa lagu liis gareeyay.*

- Laga soo bilaabo Abriil 2020, badi dadka ku dhaqan Oregon ee helay SNAP waxay sidoo kale heleen faaiidooyin cunno oo degdeg ah oo dheeraad ah bil waliba oo lagu siiyay kaarkooda EBT (Jidka Oregon). Faaiidadaa waxaa abuurtay dawladda federaalka ah si gacan looga geysto xaalada gargaarka degdegga ah ee caafimaadka fayadhowrka ee Covid-19.
    - Faaiidooyinka cunnada ee degdegga ah waa lacag dheeraad ah oo lagu daro kaararka EBT maalinta 11[aad] ama 12[aad] ee bisha.
- **Febraayo ayaa ahaan doonta bisha ugu dambeysa ee la ogol yahay faaiidooyinka cunnada ee degdegga ah. Dadka helaya SNAP waxay sii heli doonaan faaiidada SNAP Maarso 2023 iyo bil walba oo ka dambeysa Maarso.**
    - Faaiidada SNAP waa lacagta ay dadku ku helaan kaararkooda inta u dhexeysa maalinta 1[aad] iyo maalinta 9[aad] ee bil walbo.
- Labo sano, ODHS waxay siinaysay faaiidooyinka cunnada ee degdegga ah kumanaan kun oo qoys oo hela SNAP.
    - Faaiidooyinkaa waxay aad u kordhiyeen awooda dadku u leeyihiin inay helaan cunno caafimaad leh oo ku filan oo iyaga iyo qoysaskooda loogu tala galay.
    - Faaiidooyinkaa cunnada ee degdegga ah la'aantood qaar ka tirsan dadka ku dhaqan Oregon ayaa laga yaabaa inay caqabad iyo harjad ka soo wajahdo inay daboolaan baahiyaha aasaasiga ah ee ay qabaan.
- Dadku waxay eegi karaan bogga ama koontada ONE ama koontada EBT Edge si ay u arkaan inta ay dhan tahay faaiidadooda cunnada ee SNAP oo aysan ku jirin faaiidooyinka cunnada ee degdegga ah.
    - Bogga dhaashboorka ee koontadooda ONE – Lacagta caadiga ah ee SNAP ayaa lagu liis gareyn doonaa hoosta "Inta Faaiidada ee Billaha ah"
    - Hawsha koontadooda EBT Edge gudaheeda – Lacagta caadiga ah ee SNAP waxay ahaan doontaa lacagta lagu daray kaarkaaga inta u dhexeysa 1[da] iyo 9[ka] bil kasta.

- Shakhsiyaadka iyo qoysaska arrinku saamaynaayo waa inay lasoo xiriiraan maamulka gobolka iyo la hawlgaleyaasha deegaanka sida ugu dhakhsaha badan si ay u daboolaan baahiyahooda cunnada kadib markii ay helaan bishooda ugu dambeysa ee faaiidooyinka cunnada ee aasaasiga ah. Agabyada ama ilaha waxaa kujira:
    - 211 Xogta: Wac 2-1-1 ama booqo www.211info.org/
    - Isku-xirka Khayraadka Dadka Da'da ah iyo Kuwa Naafada ee Oregon (ADRC): Soo garaac 1-855-673-2372 ama booqo www.adrcoforegon.org/
    - Goobaha Gargaarka Cunnada ee Oregon waa www.oregonfoodfinder.org/
    - Goobaha gargaarka cunnada ee deegaankaaga ama bakhaar
    - Hayadaha Waxqabadka Bulshada ee deegaankaaga: www.caporegon.org/
    - Wixii kale oo agabyo ama ilo wax laga helo ah ee aad caadiyan kula talin karto dadka dhibaatada ka wajahaaya helitaanka cunno ku filan.
- Qoysaska ayaa sidoo kale ka faaiidi kara barnaamijyadaa gobolka iyo dawlada federaalka ah si ay isaga bixiyaan qarashaadkooda kale.
    - **Barnaamijka Cawimaada Tamarta ee Qoysaska Dekhligoodu Hooseeyo** (LIHEAP) wuxuu gacan ka geystaa sidii dadku badbaado iyo caafimaad ugu sii noolaan lahaayeen asagoo adeegsanaaya dadaalo ka caawiya shakhsiyaadka iyo qoysaska bixinta qarashaadka tamarta ama korontada. Booqo EnergyHelp.us ama wac 1-866-674-6327 si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan sida loo codsado cawimaada tamarta.
    - **Cawimaad dheeraad ah oo lagaa caawinaayo bixinta biilasha adeegyada guriga** waxaa bixisa Waaxda Guriyeynta iyo Adeegyada Bulshada ee Oregon (OHCS) ayadoo u mareysa hayadaha maxalliga ah. Waxaad ka codsan kartaa hayad maxalli ah webkeeda: https://www.oregon.gov/ohcs/energy-weatherization/Pages/utility-bill-payment-assistance.aspx.
    - **Barnaamijka Khadka Internetka ee Qiimaha Jaban** wuxuu bixiyaa ugu yaraan $30 oo qiime dhimis bille ah oo internetka laga dhimayo qoysaska u qalma. Haddii aad faaiidooyin ka heshid ODHS, waxaad durba u qalmi kartaa qiime dhimistaas. Si aad u qalmidaada u eegto ama u gudbiso codsi lacag aan lagaa qaadeyn oo halis la'aan ah, booqo GetInternet.gov ama wac 1-877-384-2575.
    - **Cawimaada kirada iyo guriyeynta** waxaa la bixiyaa ayadoo loo marayo OHCS. Booqo barta internetka ee OHCS oo ah https://www.oregon.gov/ohcs/housing-assistance/Pages/housing-assistance.aspx.